



## **Qaabka Ammaanka ah ee wax loo Kulayliyo**

- Ku xidho gurigaaga qalabka dareema qiiqa iyo carbon monoxide-ka oo shaqaynaya. Carbon monoxide-ku waa gaas dilaa ah oo bilaa midab ah bilaa urna ah tanoo guryaha ku ururta haddii ilaha wax kulayliyaa aanay qiiqa dibada usaarayn ama haddii dab dhaliye gudaha guriga lagu isticmaalayo.
- Marnaba ha isticmaalin isha kulka dhalisa sida girgire ama foorno waayo waxay keeni karaan khattaraha in dab ka dhasho ama carbon monoxide-ka.
- Hubi in dhammaan tuubooyinka kulka dibadda usaaraa inay nadiif yihiin si sax ahna dibadda guriga ugu saarayaan kulka, haddii anay saaraynin, carbon monoxide-ka dilaaga ahi waxa uu ku ururi qolalka. Tuubooyinka kulka saara ee heerka dhulka ah waxay gaar ahaan unugul yihiin inay awdaan baraf, la soco tuubooyinka kana nadiifi barafka iyo waxyaabaha kale ee awdaya kolba sida loogu baahdo.
- Haddii aad dab dhaliye isticmaasho sababtaad doontaba u isticmaaloo, markasta dibadda ku isticmaal kana fogee daaqadaha iyo albaabada. Tuubada qiiqa ee dab dhaliyaha waa il kale oo uu kasoo baxo carbon monoxide.
- Si aad u hesho xog dheeri ah oo la xiidhiidha badqabka jiilaalka boog Waaxda Caafimaadka ee Vermont Bogga Badqabka Jiilaalka
- Wax kasta oo guban kare ka fogee ugu yaraan saddex fiit il kasta oo tamarta kulka dhalisa.
- Eeg heerka shidaalka kulka ka hor cimilada qabow ama duufaanada. Keenista shidaalku dib ayaa ay udhici kartaa cimilada awgeed ama baahida oo korodha awgeed, sidaasi awgeed hubi inaad haysato shidaal kugu filan.